

**Qodobka 324aad**

Oggolaashaha iyo waajibaadka dhexdhixaadiyeeyasha

Oggolaashaha dhexdhixaadiyeeyasha waa inuu ahaadaa qoraal ama heshiiska lagu saxiixo. Dhexdhixaadiyeeyashu waa iney ku dhigaan xu-kunka dhexdhixaadinta muddada lagu xaddiday qodobka 331; haddii taasi la waayo ama haddii ay ka tanasulaan dhexdhixaadinta sabab caqliga gasha la'aan waxaa waajib ku ah iney bixiyaan magdhow.

**Qodobka 325aad**

Xuquuqda dhexdhixaadiyeeyasha

Dhexdhixaadiyeeyasha waxay xaq u leeyihiin in loo soo celiyo kharajka ka baxay iyo xushmada hawsha ay qabteen xadka lagu gooyey heshiiska aqbaleenna dhinacyada.

**Qodobka 326aad**

Duridda iyo ka joogsashada

Waxaa lagu dabaqayaa dhexdhixaadiyeeyasha axkaanta ku saabsan duridda iyo ka joogsashada Garsoorayaasha caadiga ah, laakiin, dhinaca ma duri karo dhexdhixaadiyeeyasha isagu magacaabay.

**Qodobka 327aad**

**Habka dhexdhixaadinta**

dhexdhixaadiyeeyasha marka ay qaadayaan Dacwadda dhexdhixaadinta waxay leeyihiin isla awoodda ay leeyihiin Garsoorayaasha caadiga ah xagga su'aal u jeedinta dhinacyada, imtixaanka maragta iyo keenidda caddaynta, Marka ay gudanayaan hawshaas waa inay raacaan Habka Xeerka Madaniga inta ay suurtoobi karto inay ka raacaan.

Hase yeeshi, uma bannaana marnaba inay amraan qabashada ama tillaaba kasta oo ka mid ah tillaabooyinka dhawridda.

## Qodobka 328aad

## Go'aanka dhexdhedaadinta

Dhexdhedaadiyayaasha waxaa waajib ku ah inay go'aanka soo saaraan 90 beri dhexdood oo laga billaabaayo taariikhda magacaabid-dooda; haddiise aan isku mar la magacaabin; waqtiga wuxuu ka bilaabanayaa magacaabiddii ugu dambeysay. Waqtiga waa la dheerayn karaa ilaa laba jeer haddii ay sidaa ku heshiiyaan dhinacyada.

haddii dhexdhedaadiyayaasha ayna ku gaarin waqtigii la qabtay ama la dheereeyey go'aankooda, awooddooda way dhacaysaa, dhinacyadana waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay magacawdaan dhexdhedaadiyayaal kale ama ay u gudbistaan dacwadcooda Maxkamadda si ay go'aan uga gaarto.

## Qodobka 329aad

## Sababaynta go'aanka dhexdhedaadinta

Waa inay dhexdhedaadiyayaasha go'aankooda asbaab u yeelaan, si waafaqsan Sharciga ama mabaadi'da caddaaladda. Xataa haddii dhinacyadu ayna si caddaan u siinin awoodaasi.

Hase yeeshee waxaa waajib ah inuu go'aanku ku dhisnaado qodobka koowaad Lambar 2 ee Xeerka Madaniga.

## Qodobka 330aad

Qaabka iyo waxyaalaha loo doonayo in laga helo  
xukunka dhexdhedaadinta

Waxaa waajib ah in laga helo go'aanka dhexdhedaadinta:

- 1.) Magacaabidda dhinacyada;
- 2.) Soo koobidda falalka iyo asbaabta;
- 3.) Saxyixa dhexdhedaadiyayaasha dhammaantood iyo magacaabidda mid kasta;
- 4.) Taariikhda iyo meesha go'aanka lagu soo saaray.

Qodobka 331aad

Dhigidda Xukunka

Waxaa waajib ku ah dhexdhexaadiyayaalka inay xukunka ku dhigaan Xafiiska Kaaliyaha ee Maxkamadda Gobolka ee meesha go'aanka lagu soo saaray 10 maalmood dhexdood oo laga billaabo maalinta uu soo baxay. Guddoomiyaha maxkamadda Gobolka markuu hubsado ansaxidda dhigidda, wuxuu ku siinayaam amarkiisa xoogga fulinta go'aanka dhexdhexaadinta; amarkaas waa inuu raacaa dhigidda go'aanka

Qodobka 332aad

Duridda

Waa bannaan tahay in lagu duro Maxkamadda racfaanka ee leh awoodda xagga dalka, go'aan dhexdhexaadinta, sababaha soo sooda oo kelj ah:

- 1.) Buritaan ka dhashay waayidda shardi ka mid ah shuruudda lagu tilmaamay Qodobka 330;
- 2.) Ilaalin la'aanta muddada lagu tilmaamay Qodobka 328;
- 3.) Ka noqoshada ka dhalanaysa sabab ka mid ah asbaabta lagu sheegay Qodobka 266.

Waxaa waajib ah in duridda lagu keeno 30 beri laga billaabo jaalinta la dhigay go'aanka.

Waa u bannaan tahay Goddoomiyaha Maxkamadda racfaanka haddii sidaa uu warsado dhinaca qadimay duridda, inuu joojiyo fulinta.

Qodobka 333aad

Heshiisyada ka baxsan Maxkamadaaha

Warqadaha heshiisyada ah ee ku dhexmara dhinacyada Maxkamadaa dibaddooda, ama ayagu naftooda ha sameesteen ama ha u sameeyaan Xafiisyada Siyaasadda ee Magaalooyinka, Tuulooyinka iyo xaafada-ha, waxay yeelanayaan xoog fulitaan ah haddii ay ka dhigan yihii Xafiiska Maxkamadda Degmada ee soohinta heshiisku ku dhammaaday.